

Ogaallo muhiim u ah caabuqa corona

Caabuqan cora wuxuu ku faafay magaalada Borlänge oo dhan, waxaana loo baahan yahay in lays caawiyo si loo yareeyo faafitaanka cudurka. Kuwa ugu nugul, waa dad ka weyn 70 jir iyo kuwa qaba cudurada salka ku haya, taasina waa midda inta badan annagu aannu u baahan nahay inaan iska jirno. Annagu waxa aannu hadda weydii-saneynaa dhammaan dadka deggan Borlänge caawimaad - xitaa haddii aad tahay dhalinyaro, caafimaad leh oo laga yaabee in aadan ka walwalsaneyn in cudurka lagugu daarto - in la muujiyo tixgelin. Wadajir ayaan u xaddidi karnaa faafitaanka cudurka..



Gurigaaga joog haddii aad adigu bukto

Haddii aad adigu bukto, xitaa haddii aad leedahay astaamo sahlan, guriga joog. Tani waxay sidoo kale khusaysaa carruurtaada



Salaan ha ugu tagin dadka da'da ah iyo kuwa buka

Dadka da'da ah iyo kuwa cuduradda joogtada ah hoary u qabay waa ay u nugul yihiin. Ha soo salaamin hada meesha ay joogaan, laakiin ku xiriiri qaab kale oo xidhiidh.



Ilaali masaafada aad u jirsanaysid dadka kale

Ka fogow qiyaastii laba mitir masaafada aad u jirsanayso dadka kale. Ka fogow in aad hab siiso dadka aadan la wadaagin guryaha. Si dheeraad ah uga fikir masaafada aad u jirsanaysid haddii aad booqatid goob jimicsi, dukaan, bas ama goobo kale oo dadweyne oo caam ah.



Ku qufa oo ku hindhis xagsga xusulkaaga

Adigu waxa aad ku qaadsiiin kartaa cudurkan qof kale adiga oo qufaca ama hindhisa uun, marka uga ilaali dadka kale adiga oo ku qufacaya ama ku hindhista xagasha xusulkaaga.



Gacmaha dhaq marar badan

Dhaq gacmahaaga dhowr jeer maalintii - iyo gaar ahaan markaad wax ku taabatid meelaha dadweynaha caamka ah. Ku dhaq saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbi-riqi mar kastaa.



Ha safrin haddii uusan daruuri ahayn

Annagu waxa aannu dalka ku haynaa faafid kala duwan oo badan. Haddaba in aad socdaasho waxay kordhiyaa halista ah in aad cudurka ku daarato dadka kale ama aad adigu cudurka qaadtid. Kaliya socdaal haddii ay dhab ahaantii daruuri kuu tahay uun.



U dukaameyso sida ugu dhif iyo naadirsan ee aad karto

Qorshee waxyaabaha aad soo iibsaneyso si aadan ugu baahan in aad soo booqato dukaanka mar walba. Waxa kale oo aad ka dalban kartaa badeecado badan oo horay loo baakadeeyey dukaanno badan oo haya- waa hab wanaagsan oo lagu yarayn karo halista faafinta cudurka. Waxa aad sidoo kale weydiisan kartaa caawimaad arrimahaas ah 0243-740 00.